

HORUMARINNADA BAASKIILKA IYO QURXINTA JIDKA EE XAAFADDA PIKE PINE

NAKH-SHADDA 60%

Aqalka Furan ee Internet-ka oo Kooban



RAADRAAC



Welcome Overview What we've heard Elements of design Places Share your thoughts Next steps

Welcome

Welcome to the Pike Pine Streetscape and Bicycle Improvements 60% design online open house! The [City of Seattle's Office of the Waterfront & Civic Projects](#), working in coordination with the [Downtown Seattle Association \(DSA\)](#) and the Seattle Department of Transportation (SDOT), is redesigning the Pike and Pine corridor to provide a safe and vibrant experience between Capitol Hill and the Pike Place Market with connections to the new waterfront.



Bishii **Nofembar 2021**, Xafiiska Mashaariicda Biyo-xigeenka iyo Kuwa Madaniga ah ayaa martigeliyay aqalka furan ee internet-ka (OOH) si uu dadweynaha ula wadaago nakh-shadda fikradda ah ee la soo-jeediyey ee 60% ee loogu talagalay Horumarinnada Baaskiilka iyo Qurxinta Jidka ee Xaafadda Pike Pine iyo si uu u dhiirrigeliyo bixinta jawaab-celin ku saabsan horumarinnada iyo beddellaadda geedaha.



QALABKA GAARSIINTA



Xayaysiin lagu baahiyay daabacadaha warbaahinta maxalliga ah oo dadka ku jihaynaysa aqalka furan ee internet-ka ah.

- **Xayaysiisyo lagu soo bandhigayo baraha internet-ka** oo lagu baahiyay daabacadaha warbaahinta maxalliga ah oo ay ka mid yihiin The Stranger, NW Asian Weekly, Seattle Chinese Times, Seattle Bike Blog iyo Real Change News.
- **Hadal kooban oo ammaan iyo xayaysiin ah oo lagu qoro baraha bulshada** ayaa lagu daabacay akoonnada baraha bulshada ee Waterfront Seattle, oo ay ka mid yihiin baraha Instagram iyo Facebook
- Warbaahinta maxalliga ah ee kala duwan, oo ay ka mid yihiin warbaahinta qowmiyaha, ayaa helay ogeysiisyo ku saabsan fursaddan xog wadaagista


- **Lagu wargeliyey oo lala kaashadey ururrada maxalliga ah, mashaariicda iyo la-hawlgalayaasha hay'adda**, oo ay ka mid yihiin Ururka Magaalada Hoose ee Seattle, Mashruuca Melrose Promenade, Seattle Neighborhood Greenways and Dadka Ka Falnaqa Fikradaha mashruuca
- **A-frames** oo leh koodhka QR kuwaas oo lagu dhejiyo goobaha istiraatiijiga ah ee ku yaalla dhinacyada marinka



A-frames-yada ku yaalla Magaalada Hoose ee Seattle

BOOQASHO

- Aqalka furan ee internet-ka ka dhacaya ayaa helay **528 booqasho oo gaar ah** intii u dhaxeysay 29 Oktobar iyo 5 Disembar, 2021
 - Marka la eego wadarta guud ee booqashooyinka, waxaan ka helnay 84 jawaabood oo sahanka ah
 - Mareegtada waxaa ku qornaa Afafka Isbaanish, Af Shiineeska La-fududeeyay iyo Af Soomaali
 - Adeegsadaaashan soo booqday, 1, 2 iyo 2 ayay waxay sida loo kala hor xusay u booqdeen boggoga Af Isbaanish, Af Shiineeska La-fududeeyay iyo Af Soomaali
 - In ka badan 70% adeegsadaaasha soo booqdey waxay ku sugan yihiin Degaan Weynaha Seattle
 - In ka badan 50% ee dadka soo booqanaya ayaa waxaa barta ku soo hagaajiyey xayaysiinnada warbaahinta ee lacagta lagu bixiyo




KALA-DHIGDHIGISTA JAWAABTA SAHANKA


75% ee dadka soo booqda degaanka waxay u soo booqdaan waxqabadyada waqtiga firaaqada ah. 62% ayaan degaanka u soo nooqda si maalinle ama toddobaadle ah

WAA MAXAY XIRIIRKA AAD LA LEEDAHAY MARINKA PIKE/PINE ?

Dooro dhammaan kuwa ku habboon.




INTEE JEER AYAAD DEGAANKAN SOO BOOQATAA?



KALA-DHIGDHIGISTA JAWAABTA SAHANKA

80% ee ka jawaabayaasha ayaa u soo lugeeya ama ku soo taraaraxa kabo ama loox lugo leh


SIDEED INTA BADAN UGU SAFARTAA WADDOOYINKA PIKE IYO PINE?



KALA-DHIGDHIGISTA JAWAABTA SAHANKA

In ka badan laba-meelood saddex ka jawaabayaasha ayaa midkood oggolaadey ama si aad ah u oggolaadey in aan ku darney yoolalka mashruuca ee ah in laga dhigo jidadka Pike iyo Pine kuwa ammaan ah, diinaamiyaad badan leh, oo si wanaagsan ugu xiran magaalada inteeda kale

MA DARENTAA IN AAN KU DARNEY YOOLALKA MASHRUUCA EE AH IN LAGA DHIGO JIDADKA PIKE IYO PINE KUWA AMMAAN AH, DIINAAMIYAAD BADAN LEH OO SI WANAAGSAN UGU XIRAN MAGAALADA INTEEDA KALE?



FAALLOOYINKA DADWEYNAHA

Maxaa inta badan kaa xiisa-geliya horumarinnadeenna ee jidadka Pike iyo Pine?


- *"Waxaan jeclahay goobaha dheeraadka ah iyo ilaalinta loogu talagalay dadka lugeynaya iyo kuwa baaskiillada wata. Waa muhiim in baraha muhiimka ah sida isgoyska leenka xawliga sare ee jidka Pike, iyo halka leemanka baaskiilka WB ay uga soo wareegaan jidka Pike una soo wareegaan jidka Pine. Waxaa loo baahan yahay in la arko qorsheyaasha loogu talagalay degaamadan si qiimeyn buuxda loogu sameeyo horumarinnada."*
- *"Leemanka ilaalsan ee ay baaskiiladu maraan oo badan, iyo baabuur yar. Haddii aan dooneyno in dadku ay ku raaxeystaan goobaheenna, soo booqdaan dukaamadeenna, oo ayna dareemaan in ay ku nool yihiin bulsho waa in aanan mudnaansiinin kaabayaasha baabuurta."*
- *"Waxaan ganacsi ku leeyahay inta u dhaxeysa waddooyinka Pike iyo Pine ee jidka Melrose Ave waxaanna aad ugu faraxsanahay in aad isugu xiriirinaysaan Capitol Hill iyo Pike Place Market waddo u wanaagsan dadka lugeynaya! Tani waxay u wanaagsanaan doontaa ganacsiga. Waad mahadsan tihiin!"*
- *"Waxaan u maleynayaa in aad badanaaba ka fikirtaan dadka magaalada imaanaya oo aadna in yar ka fikirtaan dadka halkan ku nool oo ay tahay in ay u dulqaataan dadka aan halkan ku noolayn oo ay tahay in ay la noolaadaan wax kasta iyo la murankooda."*

*Faallooyinka oo dhan waxay ku jiraan Lifaafa (1)

KALA-DHIGDHIGISTA JAWAABTA SAHANKA

85% ee ka jawaabayaasha ayaa waxay yiraahdeen in ay u badnaan doonto in ay booqdaan goobahan dadweynaha ka-dib horumarinnada la soo-jeediyay.

MA U BADAN TAHAY IN AAD SOO BOOQATO GOOBAHA GUUD KA-DIB MARKA LAGU SAMEEYO HORUMARINNADA LA SOO-JEEDIYAY?



FAALLOOYINKA DADWEYNAHA

Halkan ku wadaag faallooyinkaaga loogu talagalay geedaha la aqoonsadey in meesha laga saarayo oo la beddelayo. Geedaha goobta ayaa waxaa lagu calaamadeeyay looxyo si aad ugu aragto dhinacyada marinka haddii aad rabto in aad sidaa sameyso.

- *“Waxay ila tahay dhammaan in la beddelo si iswaafaqsanaanta ama israacsanaanta dhererka iyo qaabka aysan keliya u dhicin marka la dhammeeyo, laakiinse ay u dhacaan marka ay ku korayaan dhinacyada marinka oo dhan. Aniga ma taageersani isku-dhafka iyo iswaafajinta sinjiga.”*
- *“Fadlan beera sinjiyada ka baxa ama laga helo degaanka. Hubsada in milkiilayaasha guryaha u dhow ay ka qaybgalaan si ay u bixiyaan kharashka gacan ku haynta joogtada ah ee geedaha.”*
- *“Nakh-shadeeyayaasha, fadlan tixgeliya in aad ku dartaan ciid unugyadeeda waaweyn. Geedaha ku yaalla magaalada ayaa xannuunsada ama koritaankooda yaraada sababta oo ah waxaa yar taxaddarka loo muujiyo baahiyada geedaha yaryar ee toban-sano jirsadey ee lagu beeray degaamada magaalada ah ee ay adag tahay in ay ku koraan.”*

*Faallooyinka oo dhan waxay ku jiraan Lifaafa (2)

SAHANKA OO KOOBAN

- 84 ka jawaabayaasha gaar ah ee aqalka furan ee internet-ka ka dhacaya
- 75% waxay degaanka u soo booqdaan waxqabadyada waqtiga firaaqada
- 62% ayaa degaanka u soo nooqda si maalinle ama toddobaadle ah
- Inta badan ka-jawaabayaasha (80%) waa dadka ku lugeeya iyo kuwa ku taraaraxa kabo ama loox lugo leh
- Inta badan ka-jawaabayaasha (77%) ayaa midkood oggolaadey ama si aad ah u oggolaadey in aan ku darney yoolalka mashruuca ee ah in laga dhigo jidadka Pike iyo Pine kuwa ammaan ah, diinaamiyaad badan leh, oo si wanaagsan ugu xiran magaalada inteeda kale.
- 85% ee ka jawaabayaasha ayaa waxay sheegeen in ay u badnaan doonto in ay booqdaan goobahan dadweynaha ka-dib horumarinnada la soo-jeediyay

LIFAAQA

1. Faallooyinka dadweynaha ee Su'aasha #5: [Maxaa inta badan kaa xiiso-geliya horumarinnadeenna Pike iyo Pine?](#)
2. Faallooyinka dadweynaha ee Su'aasha #7: [Halkan ku wadaag faallooyinkaaga loogu talagalay geedaha loo aqoonsadey in meesha laga saarayo ee la beddelayo. Geedaha goobta ayaa waxaa lagu calaamadeeyay looxyo si aad ugu aragto dhinacyada marinka haddii aad rabto in aad sidaa sameyso.](#)